Codsiga ku aadan Maamulka Kheyraadka iyo Adeegyada Caafimaadka ee Mareykanka



# Deeqaha Caafimaadka Hooyooyinka & Dhallaanka

**Guudmarka Kooban**

JUUN 2023

Si aad dukumiintigaan ugu heshid qaab kale, wac 1-800-525-0127. Macaamiisha dhegoolaha ah ama maqalka ku adag, fadlan wac 711 (Washington Relay) ama iimayl u dir civil.rights@doh.wa.gov.

**Lambarka Daabacaadda**

141-092

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah ama nuqullada dheeraadka ah ee warbixintan:

Division of Prevention and Community Health

Office of Family and Community Health Improvement

PO Box 47855

Olympia, Washington 98004-7855

360-236-4501

800-525-0127 (fakis)

MCHBPublicComment@doh.wa.gov

Umair Shah, MD, MPH
Xoghayaha Caafimaadka

# Guudmarka Kooban

### Guudmarka Barnaamijka

Department of Health (Waaxda caafimaadka) waxay la shaqaysaa kuwa kale si ay u ilaaliso oo ay u hormariso caafimaadka dhammaan dadka ku nool gobolka Washington. Kani waa bayaanka hadafkeena. Hadafkeena waa in dhamaan dadka oo dhan ay helaan sinnaan iyo caafimaadka ugu wanaagsan. Barnaamijyadayada iyo

adeegyadayadu waxay gacan ka geystaan ka hortagga cudurrada iyo dhaawaca, waxay wanaajiyaan goobaha caafimaadka si ay u noqdaan meelo lagu noolaado lagana shaqeyn karo, waxay bixiyaan macluumaad si gacan looga geysto dadka inay gaaraan go'aano caafimaad qaba, iyo xaqiijinta in gobolkeenu uu u diyaarsan yahay xaaladaha degdegga ah. Waxaan la shaqaynaa hawlgalayaal badan maalin kasta si aan u qabanno shaqadan. Sidoo kale waxaan ka shaqeynaynaa inaan udub dhexaad u noqono hogaaminta bulshada iyo inaan udoodno dhammaan dadaalada..

Barnaamijka Title V ee Maternal and Child Health (MCH, Caafimaadka Hooyooyinka iyo Dhallaanka) waa qayb kamid ah Office of Family and Community Health Improvement (Xafiiska Horumarinta Caafimaadka Qoysaska iyo Bulshada) ee Prevention and Community Health (Waaxda Kahortagga iyo Caafimaadka Bulshada ee Department of Health (DOH).

Maternal and Child Health Block Grant (MCHBG, Deeqda Loogu Talagalay Caafimaadka Hooyooyinka iyo Dhallaanka) waxa ay gobolka siisaa taageero maaliyadeed iyo mid farsamo oo lagama maarmaan ah. Waxay caawisaa barnaamijyada kobciya badqabka waalidiinta, dhallaanka, carruurta, iyo dhallinyarada, oo ay ku jiraan children and youth with special health care needs (CYSHCN, carruurta iyo dhallinyarada leh baahiyaha daryeelka caafimaadka gaarka ah), iyo qoysaskooda. MCHBG waxay sidoo kale kulmisaa awoodaha caafimaadka dadweynaha ee gobolka iyo deegaanka si ay u bixiyaan adeegyada caafimaadka dadweynaha ee aasaasiga ah, kuwaas oo ah awoodaha iyo barnaamijyada *lagama maarmaanka u ah bulshooyinka ku sugan meel kasta si nidaamka caafimaadku uu uga shaqeeyo meel kasta.* Maadaama barnaamijka deeq-bixinta uu diiradda saarayo caawinta dadka dakhligoodu yar yahay ama ay ka xaddidan tahay helitaanka adeegyada caafimaadka, wuxuu caawinayaa shaqada gobolka ee ah in wax laga qabto arrimaha u sinnaanta caafimaadka.

Shaqadeena Title V waxay diiradda saartaa arrimaha la xiriira sinnaanta, wax ka qabashada baahiyaha dadka aan helin dhamaan adeegyada loo baahan yahay, iyo meeshii ay jirto baahi muuqata. Tani waxay sababtay inaan shaqadeena diirada ku saarno kordhinta sinaanta ku aadan caafimaadka anagoo taageerayna xalalka ay bulshadu hogaanka ka tahay iyo habaynta nidaamyada hagaajinta ee ku salaysan kala duwanaanshaha. Waxaan ka shaqeyneynaa sidii aan u wanaajin lahayn natiijada dhalashada ee dadka Madow ama Afrikaanka Ameerikaanka ah iyo Hindida Mareykanka ah / Dhaladka Alaska. Waxaan sidoo kale aqoonsanaa daldaloolada jira tusaale ahaan marka baahida loo qabo adeegyada ay ka badan yihiin waxa la bixinayo, sida adeegyada dhalmada iyo hidde-sidaha ee laga bixiyo dhulka miyiga ah, waxaanan heshiisyo la galnaa adeeg-bixiyayaasha si markaa si wanaagsan loogu adeego gobolladaas.

Dhammaan shaqadeena MCHBG waxay la xiriiraan ahmiyadaha gobolka. Washington waxay samaysay qiimaynta baahiyaha intii u dhaxaysay deyrta 2018 iyo gu'ga 2020 si loo ogaado baahiyaha mudnaanta leh ee adeegyada caafimaadka hooyada iyo dhallaanka iyo si wax loogu biiriyo ujeedooyinka iyo xeeladaha shaqada MCHBG ee muddo shan sano ah.

Waxaanu aqoonsanay **afar mabaadi'ii** oo aasaas u ah shaqadeena:

- Dhammaan dadku waxay mudan yihiin fursad ay ku koraan oo ay ku gaaraan heerkooda ugu sarreeya ee caafimaad iyo badqab. Wanaajinta nidaamyada u adeega qoysaska iyo carruurta si ay u noqdaan kuwa la simman dadka kale waa mas'uuliyadda aasaasiga ah ee saaran dhakhaatiirta caafimaadka dadweynaha. Waxaan si farxad leh mas'uuliyaddaan ugu lifaaqaynaa shaqadayada caafimaadka hooyada iyo dhallaanka. Waxaa naga go'an inaan ka hortagno takoor/cunsuriyad ku samaynta barnaamijyadeena iyo siyaasadaheena.
- Waxaan qiimaynaa dhaqamada ballan-qaadka ah ee ay bulshadu horumarisay isla markaana ku salaysan caddayn. Dhaqannadaan waxay xaqiijinayaan in nidaamyadayada caafimaadka ay u adeegaan qof walba, gaar ahaan dadka ku dhex takooraan bulshada caadiga ah. Waxaan u shaqeynaa qaab soo dhaweynaya dhaqan aan lahayn isweyneeysiin oo habboon.
- Waxa aanu ka shaqaynaynaa in aanu xaqiijino in habab shaqo oo looga warhaynayo waxyeelada lagu lifaaqo dhammaan barnaamijyadeena iyo adeegyadeena.

- Waa inaan sii wadnaa qiimeynta saameynta COVID-19 uu ku yeeshay dhammaan barnaamijyada oo aan u samaynaa wax ka bedel hadba sidii loogu baahdo. Waa inaan sidaas sameynaa anagoo si gaar ah diiradda u saarayna qiyamkeena iyo yoolalkeena la xiriira sinnaanta jinsiyaddaha iyo qowmiyadaha.

**Baahiyaha mudnaanta leh** ee aanu ku aqoonsanay qiimaynta oo aanu diirada ku saarnay shaqadeena waa:

- Kordhinta awoodda shaqaalaha caafimaadka dadweynaha ee deegaanka si ay si xeeladaysan ugu aqoonsadaan, u qorsheeyaan, waxna uga qabtaan baahiyaha haweenka iyo carruurta ee gobolka oo dhan.
- Kobcinta iyo ilaalinta nidaamyada caafimaadka si loo kordhiyo helitaanka wakhtigii loogu talagalay ah ee daryeelka ka hortagga, baaritaanka xilli hore ah, u gudbinta, iyo daaweynta si kor loogu qaado caafimaadka dadka inta ay nool yihiin.
- Aqoonsashada iyo yaraynta caqabadaha hortaagan helitaanka daryeel caafimaad oo tayo leh.
- Hagaajinta badbaadada, caafimaadka, iyo taageerada bulshooyinka.
- Kobcinta badqabka iyo adkeysiga iyada oo la kordhinayo helitaanka adeegyada caafimaadka habdhaqanka iyo adeegyada kale ee taageerada bixiya.
- Kor u qaadida caafimaadka iyo badqabka gabdhaha qaan-gaarka ah iyo haweenka da'ada ah, iyadoo la isticmaalayo habab dhammaystiran oo awood u siinaya isu-doodidda iyo ka-qaybgalka nidaamyada caafimaadka.
- Hagaajinta natiijooyinka caafimaadka dhallaanka iyo umusha iyo yaraynta sinnaan-la'aanta sababta cudurrada iyo dhimashada dhallaanka.
- Kor u qaadida caafimaadka iyo badqabka carruurta iyo dhalinyarada, iyadoo la isticmaalayo habab dhammaystiran.
- Aqoonsashada iyo yareynta caqabadaha adeegyada iyo taageerooyinka loogu baahan yahay carruurta iyo dhallinyarada qaba baahiyaha daryeelka caafimaad ee gaarka ah iyo qoysaskooda.
- Aqoonsashada oo ka jawaab celinta baahiyaha mudnaanta leh ee soo ifbaxaya ee la xiriira xaaladaha degdegga ah ee caafimaadka dadweynaha iyo saamaynta ay ku leeyihiin hooyooyinka iyo dhallaanka.

Baahiyahan mudnaanta leh ee gobolka ayaa hagaya xulashooyinkeena kuwaas oo deeqaha cabiraada waxqabadkeeda qaranka aynu diirada ku saarayno, kuwaas oo ah:

- Booqashooyinka caafimaadka dumarka
- Naasnuujin
- Baaritaan koriinka
- Booqashooyinka caafimaadka dhallinyarada
- Guriga caafimaadka
- Caymis ku filan

Waxaan sidoo kale kormeereynaa horumarka laga gaaray cabbirada waxqabadka gobolka ee soo socda:

- Yareynta boqolkiiba shakhsiyaadka uurka leh ee isticmaala walxaha sharci darrada ah inta ay uurka leeyihiin
- Kordhinta boqolkiiba shakhsiyaadka uurka leh ee laga baaro niyad-jabka/murugada inta ay uurka leeyihiin
- Kordhinta tirada dhallaanka ee ugu yaraan hal mar galay nidaamka baaritaanka korriinka caalamiga ah ee gobolka Washington
- Kordhinta boqolkiiba carruurta helaya daryeelka caafimaadka dhimirka markay u baahdaan
- Kodhinta boqolkiiba carruurta bilaabaya dugsiga xanaanada iyagoo muujinaya sifooyinka bulsho iyo shucuureed ee carruurta da'dooda ah
- Kordhinta cabbiraadaha adkeysiga iyadoo loo eegayo cabbirada adkeysiga qoysaska taas oo qayb ka ah Sahanka Caafimaadka Carruurta Qaranka
- Yareynta boqolkiiba ardayda fasalka 10aad ee soo sheegay inay isticmaaleen aalkolo 30-kii maalmood ee la soo dhaafay
- Kordhinta boqolkiiba ardayda fasalka 10aad ee soo sheega inay haystaan qof weyn oo ay la hadli karaan markay murugo ama rajo la'aan dareemaan

- Kordhinta boqolkiiba dhallinyerada ka warbixinaysa inay haystaan ugu yaraan hal la-taliye oo qof weyn ah
- Yareynta boqolkiiba ardayda fasalka 10[aad] ee leh baahiyaha gaarka kuwaas oo ka hadla fikradda isdilka
- Bilaawitaanka qiimaynta baahiyaha caafimaadka hooyooyinka iyo dhallaanka ee shanta sano soo socota taas oo ah geedi-socodka qorshaynta joogtada ah ee bilaabmaya mar labaad sanadkan
- Taageerida dadaallada ol-olaha tallaalka COVID-19

Halkan waxaa ku qoran dhowr tusaale oo la xariira sida aan u isticmaalno maalgelinta MCHBG iyo sida barnaamijkani u saameeyo bulshooyinka:

- Waxaan inta badan maalgelinta MCHBG u gudbinaa ilaa 34 hay'adood oo caafimaadka deegaanka (LHJ-yo) ka shaqeeya iyo 1 degmo isbitaal oo maxalli ah. Waxaan sidaas u sameynaa si aan u wanaajino nidaamyada caafimaadka bulshada iyo bixinta adeegyada MCH ee gobolka oo dhan ah. Mid ka mid ah shuruudaha deeqda waa in ugu yaraan boqolkiiba 30 ee maalgelinta loo isticmaalo ka hortagga, daryeelka aasaasiga ah, iyo adeegyada taageerada qoyska ee CYSHCN. Sababtaan awgeed, waxaan ka codsanaynaa LHJ kasta inay shaqadaan ku daraan qorshe hawleedkooda sanadlaha ah. LHJ-yadu waxay maalgelintooda u harsan u isticmaali karaan liiska xulashooyinka ee taageeraya waxyaabaha mudnaanta u leh gobolka kuwaas oo ku jira codsigeena deeqda, iyo adeegyada aasaasiga ah ee hooyooyinka iyo dhallaanka.

- DOH waxay ilaalisaa oo ay taageertaa xiriirka kala dhaxeeya barnaamijyada MCH ee LHJ-yada siyaabo kala duwan, oo ay ku jiraan saddex shaqaale oo la-taliye ah kuwaas oo diiradda saaraya isku-duwidda LHJ. Waxay bixiyaan xiriiryo lala yeesho khabiiro ku takhasusay arrimaha DOH iyo iimaylo labadii toddobaadba mar ah oo wata macluumaad iyo agabyo la xiriira shaqada MCH. Waxay sidoo kale martigeliyaan shirarka oonleenka ah iyo shirarka caadiga ah ee looga hadlayo mawduucyada MCH-ka, iyo shuruudaha warbixinta. La-taliyayaashan bulshadeed waxay fahmeen adeegyada MCH-ka iyo daldaloolada ka jira gobolka oo dhan, taas oo gacan ka gaysanaysa in aan ku biirino fahamkeenna ku aadan baahiyaha ka jira deegaanka iyo in aan waafajino dadaalladeena heerka-gobolka ah si aan u daboolno baahiyahan.

- LHJ-yada way ka guureen adeegyadii tooska ahaa ee la siinayay dadweynaha CYSHCN waxayna kordhinayaan diirad saaristooda kor u qaadista nidaamyada. Barnaamijka CYSHCN waxa uu cusboonaysiiyay Diirada Shaqada ee isku duwayaasha CYSHCN ee LHJ-yada si loo muujiyo fursadaha ay kula macaamilayaan nidaamyada u adeega CYSHCN-yada ka dhex adeega bulshadooda iyo inay ka qayb qaataan hawlaha gobolka oo dhan ka socda si loo hagaajiyo nidaamka daryeelka CYSHCN. Waxaan xeeladahaan ku waafajinay qorshaha cusub ee CYSHCN kaas oo la sameeyey iyadoo la tixgelinayo talooyinka qoysaska, LHJ-yada, iyo adeeg-bixiyeyaasha. Waxay isku geynaysaa qodobada muhiimka ah ee CYSHCN Blueprint ee cusub. DOH waxay wadahadal la furtay LHJ-yada sannadkii la soo dhaafay, waxayna sii wadi doontaa wadahadaladan sanadka soo socda, si loo eego qaabka qaybinta maalgelinta MCHBG iyo shuruudaha. Waxaan dib u eegis ku samayn doonaa shuruudaha hadda jira ee ah in dhammaan LHJ-yada ay qabtaan xoogaa shaqo ah si ay ugu adeegaan CYSHCN inay aqoonsadaan siyaabaha looga faa'iidaysan karo hufnaanta iyo in si wanaagsan loo daboolo baahiyaha ka jira gobolka oo dhan. Hannaankaan waxaa uu sidoo kale noqon doonaa qayb ka mid ah dadaalka Qiimaynta Baahiyaha ee shanta sano ah.

- DOH waxay caawimaad farsamo siisaa adeeg-bixiyayaasha iyada oo u maraysa shirarka Isgaarsiinta ee CYSHCN iyo tababaro kale. MCHBG waxay qandaraas kula jirtaa Xarunta University of Washington ee Mashruuca Iskaashiga Guryaha Caafimaadka Naafanimada iyo Hormarinta Aadanaha iyo Shabakada Nafaqada, iyo sidoo kale waxay bixisaa taageero ku aadan ka qaybgalinta qoysaska iyo hoggaaminta iyada oo u maraysa Hindisaha Hoggaaminta (Leadership Initiative) ee Gobolka Washington (WSLI), iyo waxay qandaraasyo la gashaa ururada ay qoysaska hogaamiyaan ee loogu adeegayo qoysaska. Barnaamijku waxa uu hay'adaha iyo adeeg-bixiyeyaasha kale ee gobolka kala kaashanayaa kor u qaadista nidaamyada gobolka oo dhan si loo horumariyo nidaamka daryeelka iyo iskudubaridka ee CYSHCN. Tani waxaa kamid ah ka faa'iidaysiga maalgelinta gobolka si loo taageero shabakadda xarumaha horumarinta neerfaha iyo guddiyada dib u eegista maxillofacial. MCHBG waxa ay sidoo kale taageertaa waxbarashada iyo wacyi-galinta adeegyada Medicaid ee CYSHCN iyada oo u maraysa heshiis hay'adeed oo lagula jiro hay'adda Medicaid ee gobolka, HCA.

- Washington waxay ka shaqeysaa sidii looga hortagi lahaa dhimashada hooyada iyadoo la isticmaalayo isku darka maalgelinta gobolka iyo federaalka. Gobolku waxa uu isugu yeerayaa Maternal Mortality Review Panel (Guddi Dib-u-eegis Dhimashada Hooyada) ee Gobolka si ay u eegaan dhammaan kiisaska dhimashada hooyada. Guddigan ayaa go'aamiya arrimaha wax ku biirinaya waxayna soo saarayaan tallooyinka looga hortagayo dhimashada. Sanadka 2023, waaxdu waxay soo saartay warbixin (Ingiriisi ah) oo ku wajahan waaxda sharci dejinta warbixintaas oo koobaysa natiijooyinka muhiimka ah iyo tallooyinka ku aadan ka hortagga xanuunada iyo dhimashada hooyooyinka xilliga dhalmada, iyadoo la isticmaalayo xogta 2014-2020. Natiijooyinkoodu waxay muujinayaan dhowr sinnaan la'aan oo xagga jinsiyada iyo dhaqan-dhaqaalaha ah oo gacan ka geystay dhimashadan. Warbixintaan waxay sidii hagitaan istiraatijiyadeed ahaan oo lagu hagayo maalgashiga mustaqbalka ee xagga caafimaadka hooyooyinka.

- Waaxdeena caafimaadka dhalmada/umusha waxay la shaqaynaysaa hawlgalayaal badan si ay u beddelaan nidaamkeena daryeelka ee isticmaalka maandooriyaha, gaar ahaan sida ay u saamayso shakhsiyaadka uurka leh iyo dhallaanka goordhow dhashay. Shaqadeena joogtada ah ee aan ka qabano Qorshaha ka jawaab-celinta Isticmaalka Opioid-ka iyo Isticmaalka Xad-dhaafka ah ee Daawooyinka ee Gobolka Washington (Ingiriisi ah) iyo agabyada la xiriira, iyo sharciga Horumarinta Natiijooyinka Caafimaadka leh ee Haweenka uurka leh iyo Dhallaanka (Sharciga Senetka Beddelka ah 5835 – Ingiriisi ah) waxa ku jira in la sameeyo xeelado lagaga hortagayo xanuunada uu dhalaanka la kulmo markii jirkiisa ay ka baxayaan daroogooyinkii uu la kulmi jirey intii uu uurka ku jirey iyo saamaynta kale ee si xun u isticmaalka opioid-ka iyo habaynta daryeelka dhallaanka dhasha iyadoo leh astaamaha balwad joojinta.  Iyada oo loo marayo iskaashi lala yeelano hay'adaha kala duwan ee Waaxda Carruurta, Dhallinyarada iyo Qoysaska iyo Maamulka Daryeelka Caafimaadka, waxaan abuurnay waddo ay waalidiinta dhalitaankooda uu saamayn ku yeeshay maandooriyaha iyo dhallaanka ay ku helayaan gudbin ku habboon si loo siiyo adeegyo lacag la'aan ah iyadoo la raacayo Qorshaha Daryeelka Badbaadada leh oo bedel u ah in looga warbixiyo hay'ada daryeelka carruurta.  Intaa waxaa dheer, hawlgalayaasha gobolku waxay sharci u sameeyeen cunitaanka/hurdada/u nasteexaynta (Ingiriisi ah) – habka ugu wanaagsan ee loogu talagalay daryeel siinta waalidka iyo dhallaanka.  Ugu dambayntii, waaxdu waxay sii waddaa bixinta shahaadooyin la siiyo isbitaallada haddii ay noqdaan Xarun ku Wanaagsan Daaweynta Isticmaalka Maandooriyaha Xilliga Dhalmada (Ingiriis ah).

- Qayb muhiim ah oo ka mid ah shaqadayada si aan u wanaajino caafimaadka ilmaha ayaa ah horumarinta qiimaha iyo helitaanka baarista korriinka, iyadoo dabagal hore iyo u gudbinta adeegyada waxqabadka ah loo sameeynayo marka loo baahdo. Waxaan ka shaqeyneynaa inaan yareyno caqabadaha ku wajahan booqashooyinka caafimaadka carruurta, kordhinta iyo dabagalka heerarka baaritaanka korriinka, kordhinta isku xirnaanta adeegyada, iyo kobcinta dhaqamada biilasha adeeg-bixiyeyaasha. Kadib markii aanu maalgelin ka helnay waaxda sharci-dejinta, waxaanu bilownay in aanu nidaamkeena cusub ee baaritaanka koriinka ee caalamiga ah siino daryeel-bixiyayaasha caafimaadka iyo xarumaha caafimaadka ee deegaanka. Nidaamkaan ayaa noqon doona mid ay isticmaali karaan adeeg-bixiyeyaasha iyo waalidiinta, si loola socdo heerarka baaritaanka iyo si gacan looga gaysto xaqiijinta in dhammaan carruurta gobolka ku sugan ay helaan baaritaanka lagu ogaanayo dib u dhaca korriinka.

- Si kor loogu qaado caafimaadka dhalinyarada, DOH waxay la shaqaysaa school-based health centers (SBHCs, xarumaha caafimaadka ee dugsiga ku salaysan). Dhallinyarada, gaar ahaan kuwa qayb ka ah dadka leh natiijooyin kala duwan oo caafimaad iyo bulsho, waxaa laga yaabaa inay ku adkaato helitaanka nidaamka daryeelka caafimaadka sababo badan awgood. Sababaha waxaa ka mid noqon kara gaadiid la'aan, go'doon bulsheed, xaalado nololeed oo adag, ama eex jinsiyadeed. Dhallinyaradan ayaa laga yaabaa inay goobaha dugsiga uga helaan daryeel caafimaad si aad ugu habboon, halkaasoo ay dhigtaan lagana yaabo inay ku raaxaystaan. Waxaa jira cadaymo xooggan oo sheegaya in helitaanka adeegyada SBHC iyo booqashooyinka caafimaad ee caadiga ah ee qaan-gaarnimada ay yareeyaan maqnaanshaha dugsiga, heerarka ka-bixista dugsiga, jirrooyinka daba-dheeraada, isticmaalka maandooriyaha, heerarka caabuqa galmada lagu kala qaado, iyo heerka uurka. Iyadoo la kordhinayo heerarka qalin-jabinta isla markaana la wanaajinayo maareynta cudurada sonkorowga, neefta, iyo xanuunada dhimirka.

- Xarumaha caafimaadka ee ku saleysan dugsiga waxay wajahayaan caqabado badan si ay u helaan lacag celin ku filan oo loogu talagalay adeegyada la bixiyo, taasoo saameynaysa sii jiritaankooda. Waxaan la shaqeyneynaa SBHC-yada, Maamulka Daryeelka Caafimaadka, iyo kuwa kale si aan wax uga qabanno arrimaha biilasha iyo lacag celinta.Dhalinyaro badan oo reer Washington ah ayaa xaq u leh Medicaid laakiin aan weli la diiwaan gelin. Waxaan sameyneynaa xeelado lagu kordhinayo isdiiwaangelinta si aan gacan uga geysanno kordhinta tirada dhalinyerada ee hela adeegyada daryeelka caafimaadka. Waxaa mahadcelin mudan fulinta 2021 Substitute House Bill 1225 (Sharciga Bedelka Ah ee Senetka 1225): La xiriira School Based Health Centers, (Xarumaha Caafimaadka ee Ku Salaysan Dugsiga). waxaanu bilaabaynaa shaqo cusub oo xiiso leh (Ingiriisi ah). Sharcigaan ayaa DOH ku hagaya in ay dhisto xafiiska barnaamijka SBHC si ay u balaariso una joogteyso helitaanka adeegyada ardayda iyada oo diirada la saarayo dadka taariikh ahaan aan loo adeegin.Waa tusaale kale oo muujinaya sida aan u isticmaalno maalgelinta aan ka helno ilo badan si aan wax uga qabanno baahiyaha mudnaanta leh.

Kheyraadyo maalgelineed ee kala duwan ee gobolka iyo federaalka ayaa taageeraya barnaamijkayaga guud ee MCH. Waxaan lacagaha MCHBG u isticmaalnaa inaan ku bixino qaybo ka mid ah mushaharka maamulayaasha barnaamijka kuwaas oo qorsheeya oo kormeera shaqada istaraatiijiga ah si loo horumariyo nidaamyada caafimaadka dadweynaha. Waxay ka shaqeeyaan sidii ay u xaqiijin lahaayeen haweenka iyo carruurtu inay helaan gunnooyinka caafimaad ee ay xaqa u leeyihiin, oo ay ku jiraan adeegyada caafimaadka ka hortagga ah iyo baaritaanka. Waxay sidoo kale kor u qaadaan muhiimada daryeelka la isku dubariday ee guriga caafimaadka, waxayna wax ka qabtaan arrimaha caymiska.

Maalgelinta aan ku samayno badqabka hooyooyinka, carruurta, iyo dhalinyarada ayaa sidoo kale gacan ka geysata fulinta hadafka Xafiiska Sinaanta ee Guddoomiyaha Gobolka ee ah "Qof walba oo Washington ku nool wuxuu si buuxda u heli karaa fursado, awood, iyo agabyo ay u baahan yihiin si ay u koraan oo ay u gaaraan awooddooda buuxda iyo in sinnaan iyo caddaalad ay helaan dadka oo dhan, toddobada qarni ee soo socda iyo wixii ka dambeeyaba."

### Sida Deeqaha Title V ee Federaalka ay u Dhamaystiraan Dadaallada MCH-ka ee uu Gobolka Taageeray

Cudurka safmareenka ah ee COVID-19 wuxuu si cad u muujiyay saamaynta waxyeellada leh ee ku guuldaraysiga in si ku filan loo maalgeliyo adeegyada caafimaadka dadweynaha. Iyada oo taas laga jawaabayo, miisaaniyada gobolka ayaa la kordhiyey si markaa si wanagsan loo taageero adeegyada aasaasiga ah ee caafimaadka dadweynaha ee WA, wadar ahaan $77 milyan labada sanao ee 2024-2025 iyo $100 milyan labo sano oo mustaqbalka ah. Waqti kadib, isticmaalka kheyraadka heer gobol iyo heer deegaanba ah waxay xoojin doontaa shaqada meelaha gaarka ah ee barnaamijka. Meelahaas waxaa ka mid ah xakameynta cudurrada faafa, caafimaadka dadweynaha deegaanka, caafimaadka hooyooyinka iyo dhallaanka, cudurrada daba dheeraada iyo ka hortagga dhaawaca, iyo helitaanka daryeelka. Kheyraadka ayaa sidoo kale gacan ka gaysan doona kaabayaasha si loo taageero nidaamyada macluumaadka iyo awoodda shaybaarka, iyo awoodaha sida qiimeynta, isgaarsiinta, qorsheynta xaaladaha degdegga ah, siyaasadda iyo qorsheynta, horumarinta iskaashiga bulshada, iyo horumarinta hoggaanka.In badan oo ka mid ah Maalgelinta Foundational Public Health Services (FPHS, Adeegyada Caafimaadka Dadweynaha ee Aasaasiga ah) ee gobolka waxaa loo qoondeyn doonaa caafimaadka bulshada dawladda hoose, iyaga oo taageero aad loogu baahan yahay siinaya shaqooyinka hay'adda caafimaadka dadwaynaha ee maalgelin hooseysa hela.

MCHBG waxa ay bixisaa taageerada maalgelinta aasaasiga ah ee aanu u baahanahay si aanu kordhino, heer gobol iyo heer degmo, ee adeegyada caafimaadka hooyooyinka, carruurta, iyo dhalinyarada. Mar kasta oo ay suurtogal tahay, waxaanu qaadanaynaa qaab maalgelineed oo isku dara MCHBG iyo maalgelinta guud ee gobolka iyo deeqaha kale.LHJ-yada waxay helaan 58% ee maalgalinta Title V ee Washington si ay u bixiyaan adeegyo ku salaysan liiska xulashooyinka ee waafaqsan baahiyaha mudnaanta leh ee gobolkeena. In ka yar boqolkiiba toban ee deeqdeena waxay taageertaa qandaraasyada daryeelka caafimaadka iyo ururada adeegga bulshada kuwaas oo

Department of Health kala shaqeeya waxyaabaha mudnaanta u leh gobolka. Inta soo hartay waxaa lagu taageeraa adeegyada caafimaadka hooyooyinka iyo dhallaanka ee ku sugan gobolka oo dhan, kormeerka iyo qiimaynta, qiimaynta iyo qorshaynta baahiyaha gobolka oo dhan, qorshayaasha siyaasadda mudnaanta sare leh, iyo wax ka qabashada waxyaabaha mudnaanta leh ee si liidata loo maalgeliyey.

Intii lagu jirey 2020-kii iyo 2021-kii, 35-ka LHJ-yo ee Washington waxay shaqada ka weeciyeen shaqaalaha waajibaadyada caadiga ah guta ee MCHBG si ay uga jawaab celiyaan masiibadii COVID-19. Sannadkii 2022 xaaladdan ayaa bilowday inay fududaato kadib markii la helay tallaallo. Qaar badan oo LHJ-yada ka mid ah ayaa sii waday inay u baahdaan shaqaale dheeraad ah si ay uga jawaab celiyaan masiibada. Faafida COVID-19 ayaa sidoo kale sababay kor u kaca tirada shaqaalaha iyo dhibaatada ah in la buuxiyo boosaska bannaan. Warbixinada bilaha ah ayaa ka tarjumayay baahiyahaas iyo shaqaale yeraanta. LHJ-yada qaarkood ayaa tognaan ka muujiyey daboolida baahiyaha qoysaska iyo bulshada. Waxay bixiyeen taageerada COVID-19 iyada oo la eegayo xaaladda caafimaadka dhalinyarada, waxbarashada lagula soconayo taraaumada shaqaalaha LHJ iyo waxqabadyada taageera sinnaanta nidaamyada daryeelka iyadoo diirada la saarayay dhammaan dadweynaha MCH.

### Sheekada Guusha ee MCH

Hawlgalayaasha LHJ ee gobolladeenu waxay muujiyeen hal-abuurnimo weyn iyo iskaashi bulsho oo ku aaddan shaqadooda MCH, sida ka muuqata degmada Pierce, halkaas oo shaqaalaha MCHBG maskaxdooda iyo tamartooda isugu geeyey iskaashiga, ka-qaybgalka bulsho, iyo sinnaanta caafimaadka si ay u xoojiyaan nidaamyada lagu taageerayo dadweynaha MCH.

Shaqaalaha ay maalgeliso MCHBG waxay taageeraan Pierce County Perinatal Collaborative (PCPC, Iskaashiga Adeegga Umusha ee Degmada pierce), 501(c) 3 aan faa'iido doon ahayn, iyagoo isugu yeeraya Guddiga Agaasimayaasha, iyo iyagoo la kaashanaya Guddiga fududeynta shirarka Xubinnimada Guud. Iskaashiga ayaa wax ka qabta baahiyaha sida waxbarashada dhalmada kahor, taageerada naas-nuujinta, nafaqaynta, badbaadada, iyo caafimaadka habdhaqanka, waxayna la xiriiraan in ka badan 1,000 oo ah xubnaha ku jira liiska waraaqaha (ay ku jiraan ilaa 600 xubnood oo firfircoon) kuwaas oo matalaya ilaa 100 hay'adood oo kala duwan.

Shaqaaluhu sidoo kale waxay wakhti iyo khibrad ku wadaagaan Pierce County Breastfeeding Alliance (Isbahaysiga Naasnuujinta ee Degmada Pierce), guddiga PCPC, oo ay ku jiraan shaqaalaha dhalmada ee madowga ah, duulas, u doodayaasha sinnaanta caafimaadka, iyo daryeel-bixiyeyaasha caafimaadka. Iyadoo saamayn ka soo gaartay cudurkii safmareenka ah, Isbahaysigan waxa uu la kulmay xoogaa dib u dhac ah oo ku yimid shaqadooda iyo hoos u dhac ku yimid xubinimadooda, laakiin shaqaaluhu waxa weli ka go'an xoojinta Isbahaysigan iyo taageerada naas-nuujintu Degmada Pierce ay u baahan tahay.  Shaqaaluhu waxay horumarinayaan taageerada naas-nuujinta ee bulshada iyagoo oo ah hoggaamiyeyaasha gobolka oo dhan iyo dadaallada LIFE deegaanka, isla markaasna taageeraya hindisaha La-taliyaha Naasnuujinta Peer (PBC) ee deegaanka. Barnaamijka [LIFE (Ingiriisi ah)] waa "barnaamij ikhtiyaari ah iyadoo la aqoonsanaya doorka muhiimka ah ee isbitaaladu ka ciyaaraan taageerada naasnuujinta iyo quudinta-xabadka." Degmada Pierce waxay ahayd horyaal maxalli ah oo muhiim u ah dadaalkan ka socda gobolka oo dhan, iyadoo taageeraysay isbitaallada iyo rugaha caafimaadka si ay u daba-galaan oo ay u helaan heerka ugu sarreeya ee suurtogalka ah ee qoondeynta LIFE. Hindisaha Degmada Pierce ee PBC wuxuu ku lug leeyahay horumarinta iyo joogtaynta tababbarka iyo taageerada dhaqan ahaan ku habboon PBC, iyada oo diiradda la saarayo dadka heerarka naasnuujintoodu ay hooseyso si loo baabi'iyo farqiga.

Shaqaaluhu waxaa ay sidoo kale taageeraan Qolalka Carruurta ee degmada oo dhan ah, oo ay ku jiraan Qolalka Carruurta ee loogu talagalay dadka dhaqan ahaan iyo luuqado ahaan kala duwan, iyada oo loo marayo xiriirada lala leeyahay hawlgalayaasha degaanka ee Xiriirada Qoysaska ee Gacan Ka Gaysta Koriinka ee Degmada Pierce (Xiriirada Qoysaska) iyo Pierce County Early Childhood Network (PCECN, Shabakada Carruurnimada Hore ee Degmada Pierce). Qololka Carruurta (khadka tooska ah iyo kuwa qof-ahaan looga xaadiraba) waa "meel nabdoon oo loogu talagalay dhammaan qoysaska leh dhallaanka \[ay ku jiraan qoysaska uurka leh/filaya dhalmo iyo qoysaska qaba carruur da'doodu u dhaxayso 0-1] si ay ugu xiriiraan oo ay wax ula bartaan waalidiinta kale," iyo inay xirfadlayaasha caafimaadka weydiiyaan wixii su'aalo ah ee ay qabaan. Xiriirada Qoysaska (Family Connects) waa agab lagu "daboolayo farqiga u dhexeeya qoysaska, adeeg-bixiyayaasha, iyo kheyraadka bulshada si loo xaqiijiyo [qoysaska] inay helaan taageerada \[ay] u baahan yihiin si ay u koraan oo ay u kobcaan." PCECN waa "shabakad go'aan qaadasho wadajireed samaysa oo ay hogaaminayaan shuraako ka socda ururo badan kuwaas oo leh ballanqaad wadaag ah oo lagu taageerayo carruurta iyo qoysaska degmada Pierce si ay u gaaraan meel ay ku kobcaan." Shabakadu waxay isku xirtaa in ka badan 400 hawlgalayaal ah, waxay xoojisaa qoyska inay helaan oo ay isticmaalaan kheyraadka deegaanka, waxaana ku jira Kooxda Waxqabadka kuwaas oo ka shaqaynaya inay isbeddel u sameeyaan qoysaska. Shaqaalaha LHJ waxay ku biiraan shuraakada bulshadan si ay u xoojiyaan nidaamyada daryeelka ee qoysaska iyo waalidiinta filanaya inay dhallaan siyaabo dhaqan iyo luqad ahaanba jawaab celin leh.